
# Kululaanshaha cimilada dunida

Celceliska heerkulka dhulka sare ayey u kacday 100 kii sano ee u dambeeyey. Taas macnaheedu waa celceliska heerkulka dhulku kor ayuu u socdaa.  Celceliska heerkulka dhulku wuxuu hadda 0,8 darajo ka korreeyaa siduu ahaa 100 sano ka hor. Tan waxaa lagu magacaaabaa kululaanshaha cimilada dunida. Kululaanshaha cimilada dunida waxaa u sabab ah gaasaska atmoosfeerka ku uumi baxaya gibilka.




## Gaasaska atmoosfeerka

Dhulka waxaa ku wareegsan gibil. Dibadda gibilka waxaa ku yaala hawo sare. Hawada sare waxay leedahay in ka badan 270 oo darajo sentigareydh ah.

Gibilku waxa uu ka kooban yahay neefo kala duwan,  kuwaas waxaa ka mid ah uumi biyood iyo kaarboon laba ogsaydh. Uumi biyoodka iyo kaarboon laba ogsaydh waxaa lagu magacaabaa gaasaska atmoosfeerka. Waxaa lagu magacaabaa gaasaska atmosfeerka sababtoo ah waxay dhulka ka ilaaliyaan in kuleylka ka imaanaya qorraxda uu u gudbo hawada sare. Haddii nidaamkani u dhaco si caadi ah, waxaa jira dheelitir, oo heerkulka

dhulkuna waa deganaadaa. Waxaan dhihi karnaa in gaasaska atmoosfeerku u shaqeeyaan sida xuub ku dhulka wareegsan.

Sawirka kore wuxuu tusinayaa sida qeybo ka mid ah fallaaraha kuleylka ee ka imaanaya qorraxda ay oogada dhulku u nuugto, qaar falaaraha ka mid ahina ay dib ugu noqdaan dhulka marka ay gaaraan gibilka. Haddii tani si caadi ah u dhacdo, celceliska heerkulka dhulka waa ku dhowaad 15 darajo.

## Kululeynta gaasasku kululeeyaan atmoosfeerka oo aadanahu abuuray

Kululaanshaha cimilada dunida waxaa sabab muhiim ah u ah kororka kuleylka gaasasku kululeeyaan atmoosfeerka oo ay aadanuhu abuureen. Kororka kuleylka gaasasku kululeeyaan atmoosfeerka ay aadanuhu abuureen wuxuu yimaadaa marka aan wax badan oo kaarboon laba ogsaydh ku sii dayno atmoosfeerka. Tani waxay dhacdaa, si aan tamar u helno, markaan gubno shidaal la soo qoday sida saliida, gaaska iyo dhuxusha,. Sawirka hoose wuxuu muujinayaa meelaha ay qaaca kaarboon labo ogsaydh ka yimaadaan.




Saliidda, gaaska iyo dhuxushu waxaa ku jira kaarboon badan. Kaarboon laba ogsaydh waxaa la abuuraa marka kaarboon la gubo oo uu la falgalo oksijiin. Waxaa kale oo karboon laba

ogsaydh lagu magacaabaa gaas-cimilo, sababtoo ah uumi baxa kaarboon laba ogsaydh wuxuu saameeyaa cimilada dhulka.

Markaan gubno shidaalka la soo qoday, sida saliida, gaaska iyo dhuxusha markaa waxaa la siidaynaa kaarboon laga soo miiray atmoosfeerka malaayiin sano ka hor, markaas karboon laba ogsaydh ayaa ku sii badanaya atmoosfeerka.  Waxaan arkaynaa inuu dhumuc yeelanayo xuubka dhulka ku wareegsan. Ka dibna waxaa kordhaya celceliska heerkulka, oo waxaan dhulka ku helaynaa cimilo kulul-  kululaanshaha cimilada dunida.

## Ilaha tamarta aan la cusboonaysiin karin

Saliida, dhuxusha iyo gaaska waa ilo tamar oo aan la cusboonaysiin karin. Haddii shayga aan la cusboonaysiin karin, lama adeegsan karo marar farabadan. Taas macnaheedu waa in waxaas la isticmaalay.

Saliida, gaaska iyo dhuxusha waxaa sameeyey dhir iyo xayawaano noolaa malaayiin sano ka hor. Dhirtii iyo xayawaanadii dhintay waxaa lagu shubay badweynta, ka dibna waxaa daboolay  lakabyo ciid iyo dhoobo ah. Lakabyadii ciidda iyo dhoobada ahaa waxay keeneen cadaadis sare. Cadaadiskii sare oo ay ku biirtay kuleylkii ciidda ayaa keentay in xayawaanadii dhintay iyo haraagii dhirtii dhimatay dib looga dhigo saliid, dhuxul iyo gaas. Waxay qaadatay malaayiin sano in xayawaanadii dhintay iyo haraagii dhirtii dhimatay dib looga dhigo saliid, dhuxul iyo gaas.

## Cawaaqibta ka dhalaneysa kululaanshaha cimilada dunida

Qiiqa kaarboon laba ogsaydka oo uu aadanuhu abuuray waxay saameynaysaa qaababka roobku u da’o, waxay kululeynaysaa badweynta sidoo kalena waxay keenaysaa in ay dhalaalaan barafyada dhagaxoobay iyo barafyada badweynta. Isbedelada cimiladu waxa ay si xun u saameynaysaa dadka ugu saboolsan dunida. Laakiin cawaaqibta tabani waxay sidoo kale saameynaysaa Norway iyo wadamada kale ee maalqabeenka ah.

## Qaababka roobku u da'o

Kululaanshaha dunida wuxuu saameynayaa qaabka roobku u da'o. Meesha roob yari ka da'o, waa ay sii qalali doontaa; meesha roobka badani ka da'o, waxay noqonaysaa in roobku ku sii bato. Meelo badan waxay noqonaynaa inay abaartu ku badato, meelaha kalena inay daadadku ku bataan. Abaarta iyo daadadku labadu waxay dhibaato u keenayaan xoolaha, dhirta iyo dadka.





## Cimilo xad dhaaf ah

Cimilada xad dhaafka ahi waa dabeyl aad u xoog badan iyo roob ama baraf  aad u badan. Sawirka hoose waxaad ku arkaysaa burbur yimid ka dib markay dhacday duufaan halkaas oo ay baabi'isay dhismayaashii, wadooyinkii iyo dabeecadii. Markay dhacdo cimilo xad dhaaf ahi waxaa sidoo kale adkaan karta in la helo biyo nadiif ah.





## Barafka ayaa dhalaalaya

Markuu kuleylku bato, inta badan barafka cirifyada ayaa dhalaala, sidoo kale barafyada dhagaxa dunida ayaa aad usii yaraada. Tani waxay cirib-danbeed xun u keenaysa dadka, dhirta iyo xayawaanka ku nool daafaha dunida oo dhan. Waxaa isbedeli doona aasaaska nolosha xayawaanka, dhirta iyo dadka ku nool goobaha leh barafka badan. Haddii uu dhaqso u socdo dhalaalka barafku, ma awoodi doonaan xoolaha iyo dhirta ku hoos nool ama ku kor nool barafka, inay si dhaqso ah ula qabsanaan isbedelada degdegga ah.





Baraf yaraantu waxay tusaale ahaan saameynaysaa dibi-badeedka(ringselen), kaas oo ah xayawaan ku dul nool barafka. Barafka ayuu ku dul nool yahay oo uu ilmihiisa ku dul dhalaa, kuna dul nastaa. Haddii uu barafku yaraado, dhibaato ayaa ku dhacaysa dibi-badeedka , tiradiisuna waa ay yaraanaysaa. Tusaale kale waa madaxkuti. Madaxkutigu wuxuu sidoo kale ku dul nool yahay barafka, waxaana cunto u ah dibi-badeedka. Haddii uu barafku yaraado madaxkutigu ma helaayo meel uu ku sii noolaado, cunto yari ayaa ku dhacaysa, tiradiisuna waa yaraanaysaa.

## Ilaha tamarta ee cimilada u fiican

Bani'aadam ahaan waxaan u baahannay tamar. Sidoo kale iyada oo celceliska heerkulka dhulka uusan kordhin , ma gubi karno shidaalka la soo qoday. Taas macnaheedu waa, si loo yareeyo kululeynta gaasasku kululeeyaan atmoosfeerka, inaan  ka faa'iidaysano ilaha tamarta cagaaran ee lagu macagaabo ilaha tamarta la cusboonaysiin karo ama ilaha tamarta cimilada u habboon.



Tamarta biyaha , tamarka dabeysha iyo tamarta qorraxda waxay tusaalooyin u yihiin ilaha tamarta cimilada u habboon kuwaas oo aan ahayn shidaal la soo qoday.

## Utvalgte fagord fra teksten

| | | |
|---|---|---|
| cimilo | koonka | kululaanshaha koonka |
| kululeynta gaasasku | kululeeyaan atmoosfeerka | gaasaska atmoosfeerka |
| gaas-cimilo | atmoosfaar | hummaag noqod |
| nuugid | la cusboonaysiin karo | aan la cusboonaysiin karin |
| tamar | shidaal wax la qoday ka yimid | xad dhaaf |
| cimilo xad dhaaf ah roob-da'id | qaabka roob-da'ida | cawaaqib |

Sawirada oo dhan: Shutterstock.com